# IGA CAAWI INAAN HELO SHAQO

## APPRENTICESHIP & SKILLED TRADES GUIDE



WE BUILD A DREAM

# UJEEDADA HAGAHA

Ka fikirada mustaqbalka wuxuu noqon karaa mid cajiib ah, hase yeeshee, sidoo kale wuxuu noqon karaa mid cabaqado badan oo walaac leh marka aadan si dhab ah u go'aansan karin xirfada ku habboon xiisahaaga, yoolkaaga, qiyamkaaga iyo habka nolashadaada. Aduunkeenu wuxuu isku badelayaa si joogto ah, fahanka aan ka haysano waxbarashada iyo xirfadaha ku xeerana waxay sii wadaan inay hoos u dhacaan. Hagahaan wuxuu waalidiinta iyo ardayda ka caawin doonaa inay ogaadaan fursadaha inta badan aan awooda la saarin sababo la xariira inaan laga haysan fikir, ama laga haysto xog been abuur ah ama rayi qaldan. Waxaa ku qoran xog cad oo ku saabsan sida waalidiintu gacan oga geysan karaan xirfadaha ilmahooda(carruurtooda) waxaana sidoo kale ku qoran xog hageysa dhallinta laga yaabo inay xiiseenayaan inay qaadan tallaabada xiggta. Marka lala sameeyo wada hadal wax ku ool ah, hagahaan wuxuu u shaqeeyaa sida agab jiheyn iyo xog inta waalidka iyo ardaydu qorsheynayaan mustaqbalka.

# XOG KU SAABSAN BUILD A DREAM (DHIS RIYO)



Build a Dream wuxuu bixiyaa barnaamijyo khaas ah si uu u dhiirigeliyo una xoojiyo ardayda dumarka ah si ay sameeyaan xirfadaha aysan dumarku ku badneyn, ayadoo sidoo kale ka shaqeynaysa isku dheelitirka jinsiyadaha ee goobaha shaqada, iyo wax ka badelida aragtida aduunka ka haysto waxtarka dumarka u leeyihiin bulshada.

Barnaamijyada awooda la saaraayo waxaa kamid ah Waxbarashada xanaanada ee gacanta, cilmi iswaydaarsiyo la xariira hormarka, bandhigyada wax ka barashada xirfadaha aadka loogu baahan yahay, muujinta fursadaha xirfadaha ganacsiga, barnaamijka STEM, jawaab celinta degdeg ah, xirfadaha ganacsiga, iyo hogaaminta.

# BANDHIGYADA MUUJINTA XIRFADAHA

Mustaqbalkaaga ma hubtid miyaa? Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino!

Fiiri webseedka Build a Dream si aad wax oga ogaato bandhigyadeena Muujinta Xirfadaha ee ka caawin kara.

- Wadiiqooyinka musaqbalka: Wax ka ogoow fursada aad oga qaybgeli karto dugsiga sare!
- Dream Makers (Riyo Sameeyaasha): Dhageyso dumar nala wadaagaya dhiirigelin ku saabsan taariikhda xirfadooda.
- Siraha Shirkadaha: Wax ka baro waxyaabaha ay shirkaduhu firiyaan iyo sida loo hanto fursadooda.

**BOOQO: WWW.WEBUILDADREAM.COM/EVENTS/**
**SI AAD QAAB BILAASH AH ISKAGA DIIWAANGELISO.**

# XOG KU SAABSAN POWER OF TRADES



Barnaamijka Power of Trades waa barnaamijka tababarka shaqada kahor ee dadka ku cusub Canada. Inta lagu jiro mudada 4 asbuuc ah, ka qaybgaleyaasha ayaa helaaya xog iyo talo farsamo oo ku aadan helitaanka iyo joogtaynta shaqada ganacsiyada xirfadleeyda ee Ontario. Tusaaleyaasha waxyaabaha lagu daboolaayo tababarka waxaa kamid ah: fahanka hanaanka tababarka shaqada ee Ontario, sharciyada iyo xeerarka shaqaalaha ee Ontario, fahanka waxa loo shaqeeyaasha ganacsiyada Canada ay ka doonayaan shaqaalaha cusub, diyaarinta siifiga iyo wareysiga, hadal jeediyaasha martida ee ganacsiga maxaliga ah, helitaanka shahaadooyinka caafimaadka iyo badqabka goobta shaqada, taageerada gaarka ah raadinta shaqada iyo xog iyo shaqooyin muhiim ah.

Kadib marka aad dhamayso 4 asbuuc oo tababar ah, ka qaybgaleyaasha ayaa ka qaybgeli doona shaqo gayn 3 asbuuc ah oo ay ku helayaan dookha ganacsiga shaqada ee ay doortaan.

**Shuruudaha u Qalmida si looga qaybgalo tababarka 4 asbuuc ah:**

- Waa inaad tahay qof daganaansho rasmi ah haysta ama sharci qaxooti haysta.
- Waa inaad dagan tahay Ontario.
- Waa inaad xiiso badan u qabto ganacsiyada xirfada leh.
- Waa inaad jirtaa 18 sano ama kasii wayn.

Waqti xaadirkaan, tababarka 4 asbuuc ah ayaa keliya ku baxaaya af Ingiriis.

Yoolka Aasaasiga ah ee Power of Trades waa in dadka wadanka ku cusub ay helaan xog dheeri ah, aqoon iyo in lagu xiro helitaanka xirfad la xariirta ganacsiyada xirfada leh ee ka jira Ontario. Power of Trades waa barnaamij diirada saaraaya macmiilka, kaasoo baxsha xalal ku haboon gaarna u ah baahiyaha dadka wadanka ku cusub ee kasoo kala jeeda asallada kaladuwan, kuwaasoo leh heerarka kaladuwan ee xirfadaha luuqada iyo khibrada shaqada.

Yoolka muhiimka ah waa in laga taageero loo shaqeeyaasha ganacsiyada baahiyaha shaqaale qorista, ayadoo la siinaayo liiska shaqo doon horey loo hubiyay.

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH, FADLAN BOOQO: WWW.YMCASWO.CA/POWEROFTRADES**

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

# GANACSIYADA XIRFADAHA LEH
# WAA MAXAY?

Gobalka Ontario, waxaa ka jira 144 xirfadood oo ah xirfadaha waaxaha ganacsiyada xirfadaha leh gaar ahaan waxay ka dhex jiraan 4 qaybood:

**DHISMAHAI** | **WARSHADAHA** | **SHIRKADAHA KORONTA** | **ADEEGGA**

Fursadaha xirfadaha waxay ku kaladuwan yihiin waaxaha waxaana la bartaa ayadoo la isku daraayo waxbarashada iyo ku dhexjirida shaqada ayadoo loo maraayo nidaamka tababarka shaqaalaha cusub.

Tababarka shaqada waa hab wayn oo lagu barto xirfadaha shaqada iyo kartida lagama maarmaanka u ah fulinta shaqooyinka waafaqsan heerka caalamiga aha ee shaqada iyo in laga shaqeeyo sidii loo heli lahaa shahaadada ganacsiga iyo abaal-marinta xirfadaha.

## WAA MAXAY TUSAALAYAASHA KAMID AH XIRFADAHA GANCSIYADA XIRFADLEYDA AH?

**DHISMOOYINKA:**
- Qorida dhagxaanta iyo bulunkeetiga
- Qofka sameeyaa marfashyada
- Qofka sima derbiga guriga marka la dhiso iyo naqshadeeyaha
- Koronto yaqaan
- Shaqaalaha Ka shaqeeya agabyada culus
- Shaqaalaha ka shaqeeya korontada
- Qof wax riinjiyeeya iyo qofka sameeya naqshadeyta goobaha
- Farsamo yaqaanka qalabyada
- Farsamo yaqaanka xargaha korontada

**WARSHADAHA:**
- Farsamo yaqaanka Nidaamka Korontada
- Farsamo yaqaanka Goobaha
- Farsamo yaqaanka Guud
- Farsamo yaqaanka Warshada
- Qof sameeya ama dayactira qufulada
- Xirfadlaha sameeya ama naqshadeeya Biraha
- Dadka Rakiba oo hagaajiya mashiinada
- Farsamo yaqaanka Wadada tareenada
- Shaqaalaha Macdanta Biraha
- Alxamiiste

**SHAQOOYINKA KORONTADA LA XARIIRA:**
- Farsamo yaqaanka iyo Dayactirka Diyaaradaha
- Farsamo yaqaanka ama dayactira bareega
- Farsamo yaqaanka sameeya burburka baabuurta iyo waxyaabaha soo gaara
- Farsamo yaqaanka Riinjiyeeya Baabuurta
- Farsamo yaqaanka Nidaamyada korontada iyo gaaska
- Farsamo yaqaanka Qalabka shaqada ee culus
- Farsamo yaqaanka Matoorka Bada
- Farsamo yaqaanka Qalabka dabka ee taraaga
- Farsamo yaqaanka Adeega Gaadiidka-taraaga
- Farsamo yaqaanka qalabka lagu hagaajiyo cawska

**ADEEGGA:**
- Dhakhtarka Kobciya Ilmaha Aan Caadiga ahayn
- Farsamo yaqaanka qalabka beeraha
- Farsamo yaqaanka Adeegga qalabka
- Qof ku takhusay cilmiga geedaha
- Cunto kariye
- Shaqaalaha dhallinta iyo Carruurta
- Farsamo yaqaanka Adeegga Korontada
- Timo jare / Qof naqshadeeya timaha
- Farsamo yaqaanka Netwaaga Casriga ah
- Qof ku takhusasay dharka iyo farsamada gacanta

# 6 SABABAHA AY TAHAY INAAD U TIXGELISO XIRFADA GANACSIYADA XIRFADA LEH



**1. Waxaa laga dhaxlaa Xushmad**
Mid kasta oo kamid ah xirfadahaan ayaa door muhiim ah ka ah nolasheena maalinlaha ah haddii ay ahaan lahaayeen naqshadeynta wadada mustaqbalka ee aan ku socono, dhisida guriga aan ku nool nahay, ama ilaalinta badbaadada bulshada dhexdeeda. Dalka Kanada wuxuu ku tiirsan yahay shaqada ay qabtaan waaxahaan.

**2. Helida Shaqada**
Waxaa jira dookhyo xirfad oo badan iyo fursado aan gabaabsi ahayn oo ay dadku heli karaan. Xirfadaha aan sheegnay iyo kuwo kale oo badanba waxaa loo qabaa baahi (tusaale, wax soo saarka) badanaa waxaa yar in la helo xirfadahaan taas oo la micno ah in shaqaaluhu heli doonaan mushaar badan iyo fursado badan oo ay ku sameeyaan kobac.



**3. Wax banaani Dhaqaale**
Sababo la xariira nooca shaqada iyo sida loogu baahan yahay, xirfadahaan waxaa lagu helaa mushaar fiican. Ayadoo la adeegsanaayo barnaamijyada ardayda, qaar xataa waxay bixiyaan mushaar iyo khibrad shaqo oo wax ku ool ah inta ardaydu kujiraan dugsiga sare.

**4. Kor u kaca Warshadaha**
Maadaama ay sii socdaan soo bixitaanka teknoolajiyadaha cusub, qaar kamid ah warshadaha ayaa sameyn doonaa kobac. Tusaale ahaan, 59% shirkadaha wax soo saara waxay filaan inay la kulmaan shaqo yaraan inta lagu jiro 5 sano ee soosocota. Warshadahaan waxay sameynayaan kobac waxayna ku socdaan xawaare aad u sareeya laakiin ma haystaan shaqaale ku filan si ay usii wadaan kobacaan ay sameynayaan.

**5. Kor usii qaadida Xirfadaha**
Kaliya ma helaysid xirfado farsamo oo wax ku ool ah intaad shaqada ka shaqeyneyso, sidoo kale waxaad sii hormarinaysaa xirfadahaaga casriga ah. Haddii ay jirto fursad lagu sameyn karo hormar ama shaqo kale, shirkaduhu ma fiiriyaan buundooyinka imtixaanka, waxay fiiriyaan khibradaha iyo isku dheelitirka xirfadaha (oo ay kujiraan xirfadaha shaqada wada jirka ah, tan ururka, iyo xirfadaha hadalka).

**6. Sameynta Waxa aad Jeceshahay**
Maxaad oga tanaasuleysaa xirfada sababtoo ah kama aadan shaqeyn mana aadan eegin waaxdaan? Haddii wax ay ku xiiso geliyaan aadna ku faraxsan tahay, fiiro qaabab aad u baran karto xirfada. Ku qanacsanaanta shaqada aad ayay muhiim u tahay, waxay kaa caawinaysaa inaad hesho dhiirigelin aadna dhisto kalsoonidaada inta aad ka shaqeyneyso shaqadaan.



# XAQIIQOOYIN KU SAABSAN GANACSIYADA

**Waxaa loogu talagalay dadka caqliga badan!**
Dadka ka shaqeeya ganacsiyada waa dadka xirfado badan, oo ah shaqsiyaad aqoon badan oo adeegsada xirfadaha sida xisaabta iyo fikirka wanaagsan maalin walba. Dadka ka shaqeeya ganacsiyada waxay sano sameeyaan tababarka gacanta oo lagu daray barashada iskuulka si ay bartaan xirfadaha ku aadan waxyaabaha ay ku takhasuseen.

**Waa dookha xirfada #1!**
Qaar kamid ah dadka ka shaqeeya ganacsiyada waxaa laga doonayaa inay nashqadeeyaan, dhisaan, dayactiraan inta badan waxyaabaha aan adeegsano maalin kasta, ganacsiyada waxaa loo qabaa baahi badan, waxaa lagu helaa mushaar sare oo lagu kasbado waxbarasho iyo xirfad joogto ah.

**Waxaa lagu bixiyaa Lacag!**
Kadib dugsiga sare kadib (iyo mararka qaar inta lagu jiro!) dadka tababaranaaya waxaa lacag lagu siiyaa tababarka shaqada. Ayadoo uu kor u kacaayo deeqaha iyo mushaarka ay helayaan inta ay waxbaranayaan, tababarayaasha waxay badanaa dhameystiraan tababarka ayagoo lagu leeyahay deyn yar ama aanba lagu lahayn wax deyn ah. Waxaa intaas dheer, dadka ruqsada haysta waxay badanaa shaqada ku bilaabaan mushaar badan iyo awood dakhli oo mug wayn leh.

**Waxay leeyihiin fursado suurtagal oo aan xadidneyn!**
Kadib marka tababarka shaqada dhamaaato, waxaa billoowdo fursado! Socdaal, barasho, hogaaminta koox, maareynta shirkad, billaabida ganacsi, madax u noqoshada urur. Xaalada qofka ruqsada shaqo haysta (gaar ahaan ganacsiyada heerka caalamiga ah (Red Seal trades) wuxuu furaa albaabada hormarka iyo dhaqdhaqaaqa.

**Wuxuu bixiyaa waxyaabo badan!**
Dadka ganacsatada ah ee xirfada leh waxay ka shaqeeyaan liisas waaxo oo dheer iyo bii'o waxayna badanaa sheegaan in maalin kasta mida kale ka duwan tahay. Ardaydu waa inay doortaan waxyaabaha ay arkaan inay sameenaya waana inay raadiyaan ganacsi ku habboon yoolkaas. Ma waxay doonayaan inay ka shaqeeyaan banaanka ama gudaha? Shaqee oo gacanta la gal ama banaanka ka istaag?

**Waxaa loogu talagalay qof walba!**
Inkastoo qaarkood ay sameynayaan shaqada xooga ku saleysan, hadana ganacsiyadu waxay u baahan yihiin xirfado sida hal abuur, xallinta dhibaatada, shaqado kooxeed, iyo ku dabaqida teknoolajiyada. Xasuusnoow, Ontario oo kaliya waxaa kajira 144 ganacsi oo xirfadlayaal ah.

# YAA MAAREEYA GANACSIYADA?



**Wazaarada Shaqada, Hormarka Xirfadaha iyo Tababarka**

- Waxay maamushaa oo ay dejisaa qaanuunka ganacsiyada, tababarka iyo bixinta deeqaha.
- Waxay dejisaa ganacsiyada ay qasabka tahay in loo qaato tababar waxayna iskuduwdaa heshiisyada tababarka ee u dhaxeeya shaqaalaha tababaranaaya iyo shirkadaha.
- Waaxay xaqiijisaa dhameystirka imtixaanka U qalmitaanka Shaahadada Maamulka ee Tababarka shaqada.

# TABABARKA SHAQADA EE GOBALKA ONTARIO

1. Tababarka shaqada ma kugu habboon yahay?
2. Shuruudaha waxbarashada iyo helida maalgeliye.
3. Ma u qalantaa tababarka shaqada?
4. Codso, oo dhameystir Tababarka shaqada.
5. Hel shahaadada tababarka shaqada.
6. Qor oo ka gudub Shahaadada U qalmitaanka.

**Tababar sameeye ka ahaan, waxaad qaadaneysaa casharo waxaadna baranaysaa ganacsigaaga adoo raacaya tilmaamaha shaqaalaha khibrada leh - waxaadna helaysaa lacag inta aad sameyneyso.**



**Shahaadada tababarka shaqada**

- Shahaadada U qalmitaanka Imtixaanka ee la Bixiyo marka dhammaan tababarka la dhameeyo
- Waxaan u qalmaa inaan codsado si aan u qoro Shahaadada u Qalmitaanka

**Imtixaanka U qalmitaanka Shahaadada**

- La xariir Adeega Macaamiisha ee Ganacsiyada Kuleejka Ontario si aad u bixiso khidmada imtixaanka ee ah $150+HST

# TABABARKA NIDAAMKA SHAQO BARASHADA HORDHACA AH

Waxaa loogu talagalay dadka xiiseenaaya tababarka shaqo barashada laakiin aan lahayn khibrada shaqo ama xirfado ay ku galaan suuqada shaqada.



## BARNAAMIJKA TABABARKA SHAQADA EE DHALLINTA ONTARIO (OYAP)

- Dugsigu waa inuu barnaamijka baro ardayda dugsiga sare gaar ahaan kuwa Fasalka 11 ama 12 aad
- Wuxuu ardayda ka caawiyaa inay bartaan tababarka shaqada iyo ganacsiyada ayadoo loo maraayo waxbarashada barnaamijka isku dhafka ah ayagoo helaaya khibrado shaqo oo wax ku ool ah
- Saacadaha ay shaqeeyaan waxaa la tirin doonaa dhammaadka tababarka shaqada

**U qalmitaanka Ardayga**
- ardaygu waa inuu jiro 16;
- waa inuu dhameeyay 16 buundooyin oo uu ku helay dhibloomada Dugsiga Sare ee Ontario (OSSD) kahor inta uusan bilaabin barnaamijka; waa inuu yahay arday u diiwaangashan inuu dhigto maalinta oo dhan inta lagu jiro barnaamijka;
- waa inuu ka shaqeeyo siduu u dhameystiri lahaa dhammaan shuruudaha OSSD.



# WADOOYINKA LOO MARO SHAQADA LA XARIIRTA GANACSIGA XIRFADA LEH
# WAA MUSTAQBALKAAGA, IYO DOOKHAAGA

## NIDAAMKA TABABARKA SHAQADA

**100%** Waxay helaan shaqooyin la xariira waxa ay barteen kadib marka ay qalin jabiyaan. Shaqee inta aad sameyneyso tababarka!

Lacag hel adoo Wax baranaaya! Mushaar ka bilaabanaaya $30-60K, ayadoo ay ku xiran tahay shahaadada.

**Barnaamijka Red Seal**
- Shahaadada u Qalmitaanka.
- Shahaadada Nidamaka tababarka shaqada.

**2-5 SANO**

Khiimaha Celceliska ah/Sanadkii $400-600.

Ka hel shaqo Shirkad! Deeqaha Dhiirigelinta ee Shirkada:
- www.tcu.gov.on.ca
- www.oyap.com

**85%** Inta lagu bixiyay waxbarashada tuushinka.

**Deeqaha la heli karo halkii sanaba:**
- $4000 Oo loogu talagalay in lagu dhameeyo Shahaadada Aqoonta Ganacsiga
- $2000 Oo loogu talagalay in lagu dhameeyo Shahaadada Aqoonta Ganacsiga
- $1500 Oo loogu talagalay tababarka lagu sameeyo dugsiga
- $800 Deynta dugsiyada

**Celceliska Deynta Ardayda: $0**

- 80% oo ah tababarka shaqada
- 20% fasalka
- Qiimeynta 1:1 ee Ardayga/Macalinka



**Shuruudaha koorsada:**
- Koorsooyinka E,C,N, ama U,
- Xirfadaha Xisaabta
- OYAP Heerka 1 aad
- Buundada labo Jibaarka ah

# WADOOYINKA LOO MARO SHAQADA LA XARIIRTA GANACSIGA XIRFADA LEH
# WAA MUSTAQBALKAAGA, IYO DOOKHAAGA

## KULEEJKA

**83%** Waxay helaan shaqo la xariirta waxa ay barteen kadib marka ay qalin jabiyaan.

Khiimaha Celceliska ah/Sanadkii: $4,500.


**Deeqaha la heli karo halkii sanaba:**

- $5,500 Celcelis ahaan deynta OSAP.
- Deeqaha Waxbrashada.
- Deeqda Lacagta la siiyo ardayda.

**Celceliska Deynta Ardayda:**
**$25,000**

Dhibloomada Kuleejka

- 70% fasalka
- 30% hawlaha isku dhafka ah
- Qiimeynta 40:1 ee Ardayga/Koorsada



**1-3 SANO**

**Shuruudaha koorsada:**

- Koorsooyinka C, M, ama U.
- Buundada labo Jibaarka ah.

www.ontariocolleges.ca

# WADOOYINKA LOO MARO SHAQADA LA XARIIRTA GANACSIGA XIRFADA LEH WAA MUSTAQBALKAAGA, IYO DOOKHAAGA

## JAAMACADA

**72%**

Waxay helaan shaqooyin la xariira waxa ay barteen kadib marka ay qalin jabiyaan. Waxay u baahan karaan waxbarasho kale kadib marka ay qalin jabiyaan.

Khiimaha Celceliska ah/Sanadkii: $7,500.

**Deeqaha la heli karo halkii sanaba:**

- $5,500 Celcelis ahaan deynta OSAP.
- Deeqaha Waxbrashada.
- Deeqda Lacagta la siiyo ardayda.

**Celceliska Deynta Ardayda:**

**$37,000**

Shahaadada koowaad ee Jaamacada

- 100% fasalka
- Qiimeynta 85:1 ee Ardayga/Koorsada



**3-5 SANO**

**Shuruudaha koorsada:**

- Gaar ahaan Koorsooyinka M ama U

www.ouac.ca
www.electonicinto.ca



### TABABARKA NIDAAMKA SHAQO BARASHADA HORDHACA AH (WAA IKHTIYAARI)

Haddii aad awoodo, gal nidaamka tababarka shaqada ee dugsiga sare ee ah tababarka 1 sano ah adoo sii wadanaaya dhibloomadaada. Arrintaan waxay ardayda siinaysaa fursad dheeraad ah marka ay raadsadaan cid maalgelisa.

### NIDAAMKA TABABARKA SHAQADA (2-5 SANO)

Raadi shirkad kaa bixisa tababarka si aad u saxiixdo heshiiska tababarka. Shirkadu waa inay leedahay shaqaale xirfadle ah oo kor kala socon kara tababarka. Marka laga imaado saacadaha aad sameyneyso tababarka, waxaad u baahan doontaa inaad iska diiwaangeliso fasalada farsamada lagu barto ee kugu habboon (caadiyan waxaa lagu barta dugsiga habbeenkii, ama waxaa la qaataa mar inta lagu jiro waqtiga shaqada la iska daayo).





### SHAQAALAHA DHAMEEYAY TABABARKA

Marka saacadaha la saxiixo oo si guul leh loo dhameeyo fasalada farsamada lagu barto, waxaad helaysaa Shahaadada Tababarka Shaqada. Qaar kamid ah ganacsiyada waxay u baahan yihiin jadwal imtixaan iyo in laga gudbo imtixaanka gobalka si loo helo Shahaadada U qalmitaanka (CofQ) oo laga aqoonsan yahay isla gobalkaaga.

### SHAHAADADA AQOONTA GANACSIGA (IKHTIYAARI)

Qofka dhameeyay tababarka waxaa laga yaabaa inuu u babacdhigo Imtixaanka Shahaadada Aqoonta Ganacsiga ee Gobalka si shahaadadiisa looga aqoonsado Kanada oo dhan. Waxaa jira 50 shahaado oo ah aqoonta ganacsiga oo ay kujiraan qaanado sameeyaha, farsamo yaqaanka adeegya korontada, qofka sameeya qalabyada, koronto yaqaanka warshadaha.



## CAAWIMAAD MA U BAAHAN TAHAY?

Talo bixiyaasha, xarumaha xirfadaha kuleejka, xaafiisyada shaqada maxaliga ah, hoolka ururka ganacsiga, ururada ganacsiyada (sida Golaha Najaarka Degmada ee Ontario ama Ururka Shaqaalaha Xirfadleyda ah ee Kanada), dadka kujira shabakadaada waa inay awoodaan inay kaa caawiyaan inay kugu xiraan maalgeliyaha suurtagalka ah.

# QIIMEYNTA U DHIGANTA
# GANACSIGA AH

**Maku cusub tahay Kanada mana haysataa xirfad ganacsi iyo khibrad?**

Qiimeynta U dhiganta Ganacsiga ayaad haysan kartaa haddii aad khibrad ganacsi la heshay:

- meel ka baxsan Kanada; ama
- gobal kale oo katirsan Kanada ama ismaamul laakiin aadan haysan shahaadada u dhiganta ee maamulka; ama
- ay bixiyaan Laamaha Canadian-ka ah.

MA LEEDAHAY KHIBRAD GANACSI?

HAA →

MA KEENI KARTAA CADDEYNTA KHIBRADA AMA WAXYAABAHA AAD KU TAKHUSUSTAY?

HAA →

BUUXI OO SOO DIR CODSIGA TEA

AAN LA ANSIXIN

LA ANSIXIYAY

QOR IMTIXAANKA U QALMITAANKA SHAHAADADA

NOQO QOF DHAMEEYAY TABABAR OO HELAY XAQIIJIN

MAYA ↓ (MA LEEDAHAY KHIBRAD GANACSI?)

SKUDAY BARNAAMIJKA TABABARKA SHAQADA!

MAYA ↓ (MA KEENI KARTAA CADDEYNTA...?)

ISKUDAY INAAD SAMEYSO NIDAAMKA TABABARKA SHAQADA!

## SU'AALO MA QABTAA?




**Nour Hachem-Fawaz**
President & Founder
Build a Dream (Dhis Ryo)
nour@webuildadream.com





**Ronnie Haidar**
Program Coordinator,
Power of Trades
YMCA of Southwestern Ontario
ronnie.haidar@swo.ymca.ca



Funded by: Financé par :

EMPLOYMENT ONTARIO

Ontario

Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

Funded in part by the Government of Canada's Skilled Trades Awareness and Readiness Program

Canada